Kooxda IDG ee DMCC

120 Emarat Atrium Building, Sheikh Zayed Rd, PO Box 50784, Dubai, UAE

SIYAASADDA KA HORTAGGA DHIBAATEYNTA IYO XOOG SHEEGASHO

Febraayo 2020

NOOCA 1.0

KOONTAROOLKA NOOCA

NOOCA	LA SOO SAARAY	MUALIF	WAXAA IN LA SHAACIYO AMRAY
1.0	Febraayo 20	G WINTER	G WINTER

TUSMO

TUSMO 1

SIYAASADDA KA HORTAGGA DHIBAATEYNTA IYO XOOG SHEEGASHO..... 2

1. Ku Saabsan Siyaasaddaan 2
2. WA MAXAY DHIBAATEYN? 2
3. WAA MAXAY XOOG SHEEGASHO? 3
4. Haddii Lagu Dhibaateynayo ama Laguu Xoog Sheeganayo..... 3
5. Badbaado iyo Taageero Loogu Tala Galay Dadka Ku Lug Leh..... 4
6. Haynta Diiwaanka..... 4

SIYAASADDA KA HORTAGGA DHIBAATEYNTA IYO XOOG SHEEGASHO

1. Ku Saabsan Siyaasaddaan

IDG waxaa ka go'an bixinta jawi lagu shaqeeyo oo ka madax bannaan dhibaateyn iyo xoog sheegasho iyo xaqiijinta in dhammaan shaqaalaha loola tacaamulo ayaga iyo dadka kaleba si sharaf iyo qaddarin leh.

Siyaasaddaan waxaa ku jira dhibaateyn ama xoog sheegasho taasi oo ka dhacda shaqada iyo goobta shaqada meel ka baxsan. Waxaa ku jira xoog sheegashada iyo dhibaateyn haddii ay ku kacaan shaqaaluhu (kuwaasi oo ay ku jiraan la taliyeyaal, qandaraasleyaal iyo shaqaale hay'adeed) iyo sidoo kale darafyo saddexaad sida macaamiisha, kuwa wax qeybiya iyo dadka soo booqda goobaheena shaqada.

Siyaasaddaan qeyb kama noqoto wax ka mid ah qandaraas shaqaaleysiin waxaana laga yaabaa inaan wax ka baddalno waqtigii la doono.

2. Waa Maxay Dhibaateyn?

Dhibaateyn waa habdhaqan jireed oo aan loo baahnayn, hadal iyo waxaan hadal ahayn oo leh qasadka ama saamaynta ku xadgudbidda qof sharafkiisa ama abuuridda gardarro, cadaawad, hoos u dhigid, dulleyn ama in loo abuuro jawi wareer ah. Hal dhacdo ayaa ka dhignaan karta dhibaateyn.

Sidoo kale waxaa kujira in loola tacaamulo qof si aan fiicnayn sababtoo ah inuu isu dhiibay ama uu diiday inuu isu dhiibo habdhaqankaas mar hore.

Dhibaateyn geyru sharci ah waxaa ku lug lahaan kara habdhaqan dabiiciyan galmo ah (yacni dhibaateyn galmo la xiriirta, fadlan eeg *Siyaasadda* IDG *ee Ka Hortagga Ku Takrifalid Galmo La Xiriirta iyo Xadgudub*), ama waxaa laga yaabaa inay la xiriirto da', naafonimo, dib u habayn jinsiyeed, xaalad guur ama xaalad wada noolaansho oo madani ah, uur ama dhalmo, cunsuriyad, midab, jinsiyad wadaninimo, qabiil ama asal jinsiyadeed, diin ama wax la aaminsan yahay, jinsi ama nooca galmada. Dhibaateyn waa waxaan la aqbali karin xataa haddii aysan soo galin wax qeybahaas ka tirsan.

Dhibaateyn waxaa tusaale ahaan kujiri kara:

a) habdhaqan toos ah oo jireed oo aan loo baahnayn ama "qallafsan", ay kujiraan taabasho, qanjaruufo, riixid iyo qabasho;
b) afcaal galmo la xiriirta oo aan raali la isaga ahayn ama habdhaqan wax go'aaminaya (oo laga yaabo in qofka wax dhibaateynaya uu u qaato wax aan dhib lahayn);
c) email weerar ah, farriimo qoraal ah ama xog kale oo lagu soo diro warbaahinta bulshada;
d) jeesjeesid, dhaadhaajin/canjilid ama yasmo lala xiriirshay qof naafonimadii.

Qof waxaa laga yaabaa in la dhibaateeyo xataa haddii uusan ahayn “bartilmaameedkii” la doonayay. Tusaale ahaan, qof waxaa laga yaabaa in lagu dhibaateeyo kaftanno cunsuriyad ah oo ku saabsan koox qolo gaar ah kasoo jeedda haddii kaftannadu abuurayaan jawi weerar ah.

3. Waa Maxay Xoog Sheegasho?

Xoog sheegasho waa habdhaqan weerar ah, gardarro, xaasidnimo ah ama caay taasi oo ku lug leh si khaldan in loo adeegsado awoodda taasi oo qof ka dhigi karta inuu dareemo inuu baylah yahay, uu walaacsan yahay, la dulleeyay, hoos loo dhigay ama loo hanjabay. Awood mar walba la macne ma ahan in jago awood leh la haysto laakiin waxaa soo gali kara awood shakhsi iyo awood wax lagu qasbo intaba ayadoo la adeegsanayo cabsi iyo aabyi.

Xoog sheegasho waxay lahaan kartaa qaabka tooska ah ee jismi, iyo habdhaqan hadal ah iyo midaan hadal ahayn. Xoog sheegasho waxaa tusaale ahaan kujiri kara:

a) dhibaato jismiyan ah ama maskaxiyan ah;

b) xakamayn iyo heerarka aabyiga ee kormeerka;

c) sharaf ridis aan habbooneyn oo hadallo ah taasoo ku saabsan qof waxqabadkiis;

Cambaareyn xaq ah, caqligal ah ama dhalliil wax dhiseysa oo ku saabsan waxqabadka ama habdhaqanka qof shaqaale ah, iyo tilmaamo macquul ah oo la siiyo shaqaale inta ay hayaan shaqo la siiyay, ma soo galayaan xoogsheegasho si iskood ah.

4. Haddii Lagu Dhibaateynayo ama Laguu Xoog Sheeganayo

Haddii lagu dhibaateynayo ama laguu xoogsheeganayo, ka fakar bal inaad dareemeyso inaad awooddo inaad u sheegto dhibaatada si aan rasmi ahayn adoo u sheegaya qofka ka mas’uulka ah. Waa inaad si waadax ah ugu sheegto in habdhaqankiisu uusan ahayn wax lasoo dhaweynaayo ama uu kaa dhigo mid aan raaxo dareemeyn. Haddii tani aad u adag tahay ama ceebeyn ay tahay, waa inaad u sheegto wakiilkaaga la soo magacaabay ee maxalliga ah, kaasi oo bixin kara waano qarsoodi ah iyo cawimaad loogu xallinaayo arrinka si rasmi ah ama aan rasmi ahayn.

Haddii tillaabooyin aan rasmi ahayn aysan habbooneyn, ama aysan guuleysan, waa inaad si rasmi ah arrinka ugu soo gudbiso si hoos imaanaysa Habraaca Cabashada.

Waxaan baaritaan ku samayn doonaa cabashooyinka si waqtiyeysan oo qarsoodi ah. Baaritaanka ayaa waxaa samayn doona qof leh khibrad kaasi oo aan horay ugu sii lug lahayn cabashada, haddii ay macquul tahay.

Faahfaahinta baaritaanka iyo magacyada dadka cabashada qaba iyo qofka lasoo eedeeyay waa in la sheego oo loo soo bandhigo si ku salaysan “baahi loo qabo in la ogaado”. Waxaan tixgalin doonaa bal in wax tillaabooyin ah ay lagama maarmaan yihiin in la maareeyo wixii xiriir ah oo idiin dhexeeya adiga iyo qofka la soo eedeeyay intii baaritaanku socday.

Markii baaritaanku soo idlaado, waxaan idinku soo wargalin doonaa go'aankeena. Haddii aan tixgalinno in dhibaateyn ama xoogsheegasho uu kuu geystay qof shaqaale ah, arrinta waxaa loola tacaamulayaa si waafaqsan Habraaca Edbinta sidii kiis macquul ah oo ku saabsan habdhaqan xun ama habdhaqan xun oo weyn. Haddii qofka wax dhibaateeyay ama xoog sheegashada ku kacay uu yahay daraf saddexaad sida macmiil ama soo booqde kale, waxaanu ka fakari doonaa tillaabada ku habboon ee lagula tacaamulayo dhibaatada. Haddii cabashadaada la qaddariyo iyo haddii kaleba, waxaan ka fakari doonaa sida ugu wanaagsan ee loo maareyn karo xiriirka shaqo ee idinka dhex socda adiga iyo qofka arrinku khuseeyo.

5. Badbaado iyo Taageero Loogu Tala Galay Dadka Ku Lug Leh

Shaqaale soo gudbiyay cabashooyin ama uga qeyb qaatay si niyad sami ah baaritaan waa inaan loo geysan qaab un aargoosi ah ama dhibaateyn taa darteed. Qofkii lagu helo inuu ka aargoostay ama u dhibaateeyay qof sidaan waxaa laga qaadi doonaa tillaabo edbin ah oo waafaqsan Habraaca Edbinta.

6. Wakiil Maxalli ah

Kooxda maareynta ee IDG dalka u qaabilsan waxay soo magacaabaysaa wakiil dhexdhexaad ah oo himilo leh dal waliba gudihiisa si loo bixiyo meel wax lagala soo xiriiro oo loogu tala galay dhammaan shaqaalaha doonaya inay soo tebiyaan dhacdo ama doonaya talo. Meelo kale oo dheeraad ah oo wax lagala soo xiriiro ayaa la soo magacaabi karaa oo ah meelahaasi halkaasi oo waddo loo maro wakiilka dalka aysan macquul ahayn. Wakiilka waxaa mas'uul looga dhigay dhagaysiga iyo la tacaamulka wixii cabasho ah, waxaana loo baahan yahay in qarsoodi laga dhigo wixii dhacdo ah mar walba, sida ku cad qeybta 5aad ee Siyaasaddaan.

Haddii qof shaqaale ah uu doonayo inuu soo gudbiyo cabasho rasmi ah waxaa ku taageeraya wakiilka inuu sidaasi yeelo; haddii sidaasi la codsado. Markaa, wakiilka ayaa diyaar usii ahaanaya wali inuu ku caawiyo maareynta dhammaan hawlaha xiga uuna taageero xubinta shaqaalaha ka tirsan ee cabashada soo gudbinaysa. IDG maareeyeheeda gaarka ah ayaa la tacaamuli doona dhacdada.

7. Haynta Diiwaanka

Xog ku saabsan cabashada ama qof shaqaale ah ayaa la galin karaa qofka shaqaalaha ah galkiisa ayada iyo diiwaan ku saabsan natiijada iyo wixii qoraallo ah ama dukumiintiyo la isku soo duway intii hannaanku socday.